



JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA

Wasiirka Warfaafinta, Dhaqanka iyo dalxiiska

Muqdisho - Soomaaliya

25 March 2016

Warsaxaafadeed

Wasiirka Warfaafinta, Dhaqanka iyo Dalxiiska ee Dawladda Federaalka ah ee Soomaaliya ayaa warsaxaafadeed ka soo saaray Safarkii ay Magaaladda Beledweyne ku tageen waftigii uu hogaaminayey Ra'iisul Wasaaraha Jamhuuriyadda Soomaaliya Mudane Cumar Cabdirashiid Cali Sharma'arke oo Wasiirka Warfaafintu ka mid ahaa.

Wasiirku wuxuu guud ahaan ummadda Soomaaliyeed iyo gaar ahaan shacabka reer hiiraan iyo Beledweyne u sheegayaa in Ra'iisul Wasaaraha iyo Waftigiisu Beledweyne la yimaadeen niyad wanaagsan iyo in ay ka dhegaystaan Salaadiinta iyo waxgaradka reer beledweyne xaaladaha gobolku ku suganyahay ee dhinacyada siyaasadda, amniga iyo nolosha dadka iyo duunyada maadama ay dalka ka jiraan abaaro iyo biyo la'aan meelo badan oo dalka ah fara ba'an ku haya. Waftigu waxay la kulmeen dhamaan qaybaha bulshada iyo madax dhaqameedka beelaha degan Hiiraan, si guud markii loo fiiriyona waxay isku afgarteen waxyaalihii ay ka wada hadleen oo ay ku jirto afgarashadaas in xal kama dambeys ah loo raadiyo arimo ay beelaha qaar si gaar ah uga cowdeen ama ku codsanayeen in wax laga bedelo.

Hadaba wuxuu Wasiirku sheegay in hadalkiisii arintaas la xiriirey ay si khalad ah u fasireen markii ugu horeysay Warbaahinta qaar oo markii dambe raali gelin ka bixiyey iyo dad warbaahinta bulshada u isticimaala si xun oo aan masuuliyaddi ku jirin, ka dibna ay ku saamoomeen oo run u qaateen beentii la faafiyey oday dhaqameed iyo dad badan oo kale.

Dadweynaha reer hiiraan waxaanu u sheegaynaa in dawladda Soomaaliyeed iyo Wasiir Warfaafin ahaanba aanu la jecel nahay reer hiiraan nabad iyo Barwaaqo, qudbadihii iyo hadaladii na dhexmarayna ama aanu ka jeedinay Warbaahintuna ahaayeen kuwo aanu ku doonayno wanaaga reer hiiraan kuna dhiirigelinayno in ay heshiiyeen oo midoobaan kadibna dhistaan maamul ay raali ka wada yihiin oo u horseeda nabad iyo horumar. Umma taagnin qorshe nooguma jirto in aanu idiin dulmino ama xaq aad leedihiin idiin seejino, waxaanu u taaganahay oo shaqadayadu tahay in aanu idiin adeegno oo idiinku taageerno sidii ay ku gaari lahaydeen danihiina iyo danta guud ee qaranka Soomaaliyeed.

Waxaanu ka codsanaynaa Salaadiinta iyo waxgaradka reer hiiraan in ay heshiisiyaan beelahooda iyo shacabkooda, una horseedaan sidii ay ku gaari lahaayeen nolol ka fiican tan ay maanta ku jiraan iyo maamul ay raali ka yihiin oo u adeegga.

Mahadsanidin

